

Dulmarka Mashruuca

Khadka METRO Bronze Line waa wado gaadiidka basaska degdegga ah oo qorshaysan oo adeeg gaadiid oo degdeg ah lana isku hallayn karo siin doonta magaalooyinka Saint Paul iyo Maplewood waxayna isku xiri doontaa adeegyada hadda jira iyo kuwa mustaqbalka ee tareenka fudud iyo gaadiidka baska degdegga ah ee nidaamka METRO, oo ay ku jiraan isku xirada tooska ah ee Green Line, Gold Line, B Line, G Line, iyo H Line, iyo sidoo kale wadooyinka basaska ee maxalliga ah iyo kuwa degdegga ah. Wadadan waxay ka bilaaban doontaa Union Depot ee magaalada hoose ee Saint Paul ilaa Maplewood Mall Transit Center, guud ahaan ku teedsan Robert Street iyo Phalen Boulevard koonfurta Maryland Avenue iyo dhinaca White Bear Avenue waqooyiga Maryland Avenue. Wadada waxay beddeli doontaa Jidka 54 ee ku teedsan White Bear Avenue iyo qayb ka mid ah Maryland Avenue oo leh adeeg iyo tas-hiilaad la xoojiyay. Wadada waxay sare u qaadi doontaa marin-uhelka shaqooyinka, guriyaynta, iyo adeegyada, taasoo kor u qaadaysa soo jiidashada iyo tartamidda aagga bari ee magaalada.



Jadwalka Mashruuca

Guddiga Maamulka Dariiqa (CMC) waxaa la filayaa inay soo jeediyaan talo lagu sii wadayo mashruuca inta lagu jiro kulankooda Diseembar 11. Talo soo jeedinta CMC kadib, Golaha Magaalada waxay qaraar taageero ka raadsan doonaan Ramsey County iyo magaalooyinka Maplewood iyo Saint Paul.

Jadwal guud oo ku aadan nakhshadaynta, dhisidda, iyo furitaanka mashruuca cusub ayaa hadda lagu guda jiraa. Xog dheeraad ah oo ku saabsan jadwalka muddada-dheer ayaa la bixin doonaa marki la helo. Dhismaha hadda lama filayo kahor sanadka 2028.

2025				2026	
Sibteembar	Oktoobar	Nofeembar	Diseembar	Janaayo	Febraayo

Wacyigelinta Dadweynaha

Qaraarada Taageerada


Aqoon-
iswaydaarsiga
Degmada

Waxqabadka
CMC

Isku dubaridka la-hawlgalayaasha mashruuca ayaa keentay qeexidda soo socota:

Gudaha Maplewood, mashruuca waxaa ka mid ah:


- Hagaajinta boosteejada dhammaadka wadada ee Maplewood Mall Transit Center
- Meelo kor ka dadadan oo uu rakaabku ku sugo oo istareex ah oo leh tas-hiilaad kala duwan oo ay ku jiraan iftiiminta iyo kor u qaadista bilicda
- Wax ka beddelada mudnaanta calaamada taraafikada gaadiidka
- Hanashada dhulka dariiqa oo kooban si boos loo siiyo aagaga boosteejada
- Hagaajinada isgoysyada boosteejada, sida:
 - » Taagaga dadka lugaynaya iyo calaamadaha
 - » Beddelidda suurtagalka ah ee nalalka taraafiga ee gaboobay
- Basaska waxay adeegsan doonaan seedadka ujeedooyinka guud ee waqooyiga Larpenteur Avenue



White Bear Avenue iyo County Road C ee Maplewood

Gudaha Saint Paul, mashruuca waxaa ka mid ah:

- Nakhshadda mashruuca waxaa ka mid ah BRT cusub iyo dhabbo buundo oo waxyaabo badan loo isticmaalo oo la dul saaro Johnson Parkway (inta u dhaxayso Cook Station iyo Maryland Avenue)
- Meelo kor ka dadadan oo uu rakaabku ku sugo oo istareex ah oo leh tas-hiilaad kala duwan oo ay ku jiraan iftiiminta iyo kor u qaadista bilicda
- Basaska waxay mari doonaan seedadka geesaha ah ee wadooyinka Maryland iyo White Bear ee koonfurta Larpenteur Avenue taasoo u oggolaanayso gaadiidka guud inay midig ugu leexdaan wadooyinka ama dariiqyada maxalliga ah
- Horumarinada kale ee Saint Paul waxaa ka mid ah:
 - » Seedad u gaar ah baabuurta bidix u leexanayso iyo meelo u dhexeeyo wadooyinka oo cusub
 - » Taagaga dadka lugaynaya iyo calaamadaha
- Wax ka beddelada mudnaanta calaamada taraafikada gaadiidka
- Hanashada dhulka dariiqa si ay boos u siiso dib-u-dhiska wadada iyo goobaha boosteejada



Maryland Avenue iyo Clarence Street ee Saint Paul

KU XIRNOW

Haddii aad danaynayso in shaqaalaha Bronze Line ay yimaadaan kooxdaada xaafada, ururka bulshada, mehrada, ama dhacdada, fadlan la xirii.



Isqor si aad
warbixinada iimayl ugu
hesho: [metrotransit.org/
bronze-line-project](https://metrotransit.org/bronze-line-project)



Iimayl noo soo dir:
[BronzeLine@
metrotransit.org](mailto:BronzeLine@metrotransit.org)



Na soo wac:
651-602-1955

Na soo follow-garee: @
MetroTransitMN



If you need this information in an alternative format or language, contact:

Si necesita esta información en un formato o idioma alternativo, póngase en contacto con:

Yog koj xav tau cov lus no txhais uas lus hmoob lossis xav tau ib tus neeg pab txhais cov lus no rau koj, tiv tauj:

Haddii aad dooneyso in aad macluumaadkan ku hesho siyaabo kale ama afaf kale, la xirii

နမူနာလုပ်ငန်းတော်တို့ကိုအသံ၊ ကျုံး၊ ကျုံးအသံ၊ မှတ်တမ်း၊ ကျုံးအသံ၊ ဆုံးကျိုး